

HORAY UGU CODAY WARQADDA CODBIXINTA MAQANAHA



Gobolka Minnesota, khasab ma aha in aad sugtid ilaa Maalinta Doorashada—horay ugu coday warqadda codbixinta maqanaha!

HORAY U CODAY QOF AHAAN

Waxaad warqadda codbixinta maqanaha ku ridi kartaa xafiiska doorashooyinka ee deegaankaaga laga bilaabo 46 maalmood ka hor Maalinta Doorashada. Booqo mnvotes.gov si aad u ogaatid saacadaha iyo goobaha.

HORAY U CODAY ADIGOO BOOSTA KU SOO DIRAYA

Waxaad kaloo cadsan kartaa in warqadda codbixinta laguugo soo diro boostada. Waa in aad warqadda codbixinta soo celisaa ugu dambayn Maalinta Doorashada.

- ① Ka codso warqad codbixin waqtii kasta mnvotes.gov. Saraakiisha doorashadu waxay soo diri doonaan qalabka codbixinta marka waraaqaha codbixnta la helo (taariikhaha gadaal ka eeg).
- ② Si taxadar leh u akhri tilmaamaha la socda warqaddaada codbixinta! Warqaddaada codbixinta lama tirinayo haddii aadan buuxin dhammaan foomamka.
- ③ Waxaad u baahan doontaa markhaati marka aad dhamayso warqaddaada codbixinta. Markhaatigu wuxuu noqon karaa codbixiyey ka diiwaangashan Minnesota ama nootaayo. Markhaatigaagu waa in uu saxiixaa baqshadda saxiixa uuna ku qoraa cinwaankooda.

TAARIIKHADA 2024

DOORASHADA AASAASIGA
Talaada, 13ka Bisha 8aad (August)

MAQNAANSHO KU CODAY

Coday adigoo boostada ku soo diraya ama qof ahaan imanaya 20ka Bisha 9aad (September) ilaa 4da Bisha 11aad (November).

ISDIIWAANGELI SI AAD U CODYASO

Hory isdiiwaangeli ugu dambayn 15ka Bisha 10aad (October) si aad waqtii u hesho Maalinta Doorashada.

MAALINTA DOORASHADA
Talaada, 5da Bisha 11aad
(November)

waa socotaa eeg bogga gadaale...

Xafiiska Xoghayaha Gobolka Minnesota
mnvotes.gov • 1-877-600-VOTE

HORAY UGU CODAY WARQADDA CODBIXINTA MAQANAHA



...ka timid horay

④ Haddii aadan u diiwaangashanayn in aad cod bixiso, waxaad heli doontaa arji isdiiwaangelin oo ku dhex jira qalabkaaga. Si aad isudiiwaangelisid, tus qofka markhaatiga kuu ah mid ka mid ah aqoonsiyada ku taxan tilmaan bixinada.

Markhaatigaagu waa in uu ku calaamadeeyaa baqshadda saxiixa aqoonsiga aad tustay.

⑤ Markaad dhamayso ka dib, bib boostada ugu soo dir codbixinta iyo foomamka isla markiiba. Wuxaan sidoo kale shaqsi ahaan aad u soo celin kartaa codbixintaada xafiiska doorashada ee soo dirtay codbixintaada. Doorashada Guud ee Noofambar 3, 2020, warqadaada codbixinta ee aad Soo celisay waa in ay shaanbada qabashada boostadu ay ku dhegantahay maalinta doorashada ama kahor Maalinta Doorashada oo ay ku soo gaadhaa degmadaada toddoba maalmood gudahood ka dib Maalinta Doorashada.

LA SOCO WARRQADDAADA CODBIXINTA

Dhammaan waraaqadaha codbixinta maqanaha ee soo gaaray xafiiska doorashada foomamkana loo soo buuxiyay si sax ah ayaa loo tirin doonaa. Booqo mnvotes.gov si aad ula socota meesha xaalka warqaddaada codbixintu marayso iyo si aad u xaqijiso in la helay lana tiriay.

| TAARIKHAHA 2024 | DOORASHADA AASAASIGA | Doorashada Guud |
|---|--|--|
| Warqadaha codbixinta waxaa la dirayaan laga bilaabo | Jimce 28ka Bisha 6aad (June) | Jimce 20ka Bisha 9aad (September) |
| Waxaa lagugula talinayaan in aad codsato ka hor | Jimce 12da Bisha 7aad (July) | Jimce 4da Bisha 10aad (October) |
| Warqadda codbixinta waa in la helaa ugu dambayn | Maalinta Doorashada Talaado 13ka Bisha 8aad (August) | Maalinta Doorashada Talaado 5da Bisha 11aad (November) |



Xafiiska Xoghayaha Gobolka Minnesota
mnvotes.gov • 1-877-600-VOTE